

# ILAHA IYO MACLUUMAADKA LA SIIYO DAGGANEYAASHA

## Sida waafaqsan Sharciga Ogeysiinta Dagganaashada Guriyeynta (Housing Stability Notification Act)

Haddii aad tahay qof daggan Boston, waxaad xaq u leedahay kaalmo ka socoto wakaaladaha soo socdo. Waxaa dhici karto in ay jiraan xoogaa heerar loo sameyay dakhliga iyo sharuudo kale oo la xariira xaq u yeelashada.

**Si aad u heshid kaalmo, booq Mashruuca Kaalmada Sharciga Saaridda COVID ee laga helo [evictionlegalhelp.org](http://evictionlegalhelp.org) ama wac 211.**

Si aad u heshid kaalmo lagu xalliyo arrimaha milkiilaha hantida/dagganaha, kana mid ah ka-saaridda, kaalmada raadinta guryaha, tixraacinta adeegyada sharciga, iyo arjiyada kaalmada maaliyadda, booqo: **[boston.gov/housing-stability](http://boston.gov/housing-stability) ama wac (617) 635-4200.**

Si aad u heshid kaalmada kirada, lacagaha kirada aruurta, iyo/ama kharashka guuritaanka, booqo: **Maaliyadda Kaalmada Kirada Gobolka (State Rental Relief Fund) (RAFT)** [mass.gov/covid-19-getting-help-with-housing-costs](http://mass.gov/covid-19-getting-help-with-housing-costs) ama la xariir 211 **Maaliyadda Kaalmada Kirada Magaalada** [boston.gov/rental-relief](http://boston.gov/rental-relief) ama la xariir 311

Si aad u heshid kaalmo iyo u-doodid la xariirta ka-saaridda, la xariir: **Adeegyada Sharciga Boston ta Balaaran (Great Boston Legal Services)** (617) 603-1807 **Xafiiska Kaalmada Sharciga Harvard (Harvard Legal Aid Bureau)** (617) 495-4408 **Xarunta Adeegyada Sharciga ee Dugsiga Sharciga Harvard (Legal Services Center of Harvard Law School)** (617) 390-2535

## XAFIISKA SUGIDDA GURIYEYNTA XUQUUQDA DAGGANEYAASHA KU LUGTA LEH KIISKA KA-SAARIDDA

Waxaa muhiim ah in aad la tashatid qareen sida ugu dhakhsiyaha badan. Daggane ahaan, waxaad dooran kartaa in aad, **balse qasab kuguma aha**, in aad guurtid taariikhda ka-bixidda ee ku qoran Ogeysiiska Ka Saaridda (Notice to Quit). **MAXKAMADDA KELIYA AYAA AMMAR KU BIXIN KARTA IN AAD KA BAXDID GURIGAADA.** Waxaa dhici karto in Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) uu kuu diro qareen iyo in uu ku siiyo ilo kale oo laga helo macluumaad ku saabsan ka-saaridda. Booqo [boston.gov/eviction-questions](http://boston.gov/eviction-questions) si aad u heshid macluumaad badan. Waxaa jirta joojin ay Federaalka ka soo saartay ka-saaridda guryaha. Waxaa dhici karto in lagu aqoonsado balse waxaad u baahan tahay in aad foomka caddeynta CDC ka buuxisid [boston.gov/eviction-questions](http://boston.gov/eviction-questions).

### OGEYSIISKA KA-SAARIDDA (NOTICE TO QUIT)

**Milkiilaha hantida wuxuu dagganaha siiyaa Ogeysiiska Ka Saaridda (Notice to Quit) (inta badan kiisaska)**

- Waa isbaddali doontaa tirada ogeysiiska taasoo ku xeran nooca dagganaashada. Inta badan kiisaska, waxay qaadan doontaa 14 ilaa 30 maalin ama ogeysiiska muddada kirada.

### ASHTAKADA MAXKAMADDA

**Milkiilaha Hantida wuxuu dagganaha siin doonaa soo koobidda Ashtakada**

- U Yeeridda iyo Ashtakada (Summons and Complaint) waxaa gacanta ku geyn doono sarkaalka maxkamadda/shariifka AMA waxaa lagu dhaafi doonaa abarmanka dagganaha kaddibna waxaana lagu diri doonaa warqadaha boostada darajada kowaad.
- Waxay u badan tahay in U Yeeridda iyo Ashtakada (Summons and Complaint) soo taxaaban taariikhda maxkamadda, taariikhda laga jawaabo, goobta ay ku taal maxkamadda, iyo sida loola xariiro dhageysigaada, ha ahaato telefoon ama shirarka isgaarsiinta (teleconference). **SI GAAR AH ULA SOCO TAARIIKHDAAN.**
- Inta badan dhageysiyada waxaa lagu qaban doonaa Zoom. Haddii aad dooneysid in aad ka gashid kombuyutar, fadlan wac mid ka mid ah ilaha sharciga ee ku qoran kor.
- Waxay u badan tahay in dagganaha la siiyo ugu yaraan 2.5 todobaad oo ogeysiis ah ka hor inta aan la gaarin taariikhda maxkamadda. Macluumaad badan oo ku saabsan taariikhda aad leedahay maxkamadda waxaad ka heli kartaa [masscourts.org](http://masscourts.org).
- Inta uu socdo dhageysigaada, waxaad heli kartaa qareen lacag la'aan ah. WAA IN AAD WEYDIISATID IN AAD LA HADASHID QAREENKAAN.**

### GUDBINTA JAWAABTA IYO DALABKA DACWADDA GUDIIGA (ANSWER AND DEMAND FOR JURY TRIAL)

**Dagganaha wuxuu xaq u leeyahay in uu soo gudbiyo Jawaabta iyo Dalabka Dacwadda Guddiga Dhageysato (Anser and Demand for Jury Trial), iyo warqado kale ugu dambayn taariikhda loo qabtay ("Taariikhda Jawaabta") sida ku qoran Ashtakada (Complaint)**

- Dagganaha wuxuu maxkamadda u soo gudbin karaa iyo wuxuu milkiilaha hantida (ama qareenka milkiilaha hantida) siin karaa Jawaabta iyo Dalabka Dacwadda Guddiga (Answer and Demand for Jury Trial) ugu dambayn taariikhda Jawaabta ku qoran Ashtakada.
- Jawaabta waxay sharaxdaa difaac kasta ama sheegashooyinka ka soo horjeedo uu dagganaha ka haysto sheegashada milkiilaha hantida xagga haysashada, kirada leyska rabo, iyo jebinta heshiiska kirada. Sheegashooyinka ka soo horjeedo waa sheegashooyin uu dagganaha uga soo horjeedo milkiilaha hantida sida xaaladaha xun ama sida qaldan ee loo qabto curaarta la dhigo.
- Isla waqtigaas ugu dambeeyo, dagganaha wuxuu xaq u leeyahay in uu soo gudbiyo iyo in uu soo jeediyo codsiyo uu ku ogaado (codsiyada macluumaadka laga dalbado milkiilaha hantida ee ku saabsan kiiska) iyo Dalabka in la qabto Dacwadda Guddiga (Demand for Jury Trial).

Isticmaal koodka QR ama booqo [boston.gov/tenant-notification](http://boston.gov/tenant-notification) si aad u aragtid warqadaan oo ku qoran luqado kale.

Warqadaan waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo macluumaad keliya mana loo qaadan karo sida la-tallinta sharciga oo ka socoto ama lagu mattalo Magaalada Boston.

